# Tallaalada COVID-19

## Waxyaabaha ay Tahay Inaad Ogaato

Tallaalka COVID-19 waa badqab waxa uuna leeyahay waxtar. Akhriso macluumaadkaan si aad wax badan uga ogaato tallaalada. La hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada ama farmashiistaha haddii aad wax su'aalo ama walaac ah qabtid.

## Ka helitaanka tallaalka Jaamacada Ohio

Waxaa lagu siin doonaa warqad macluumaad oo ku saabsan tallaalka aad qaadan doonto iyo kaarka tallaalka. Tallaalka waxaa lagu bixiyaa duritaan iyadoo irbad lagu duraayo muruqa gacantaada kore.

Haddii aad xanuunsan tahay, ama aad qabtid qandho gaaraysa 100 digrii F ama kasii sareysa, waa inaad sugtaa illaa inta aad ka buskooneyso kahor inta aadan qaadan tallaalka.

**U qorsheey ballantaada inay qaadan doonto illaa 1 saac.** Waxaad u baahan doontaa inaad sugto 15 illaa 30 daqiiqadood kadib markaad qaadato tallaalka si kalkaaliso u hubiso wax dareen-celin ah.

**Tallaalkaagu wuxuu noqon karaa 1 ama 2 kuuro. Sidoo kale waxaa lagugula talin karaa inaad qaadato kuurada saddexaad ama daawo xoojin ah.**

## Waxyeelooyinka tallaalka

Tallaallada **kuma jiraan fayras nool**, sidaas daraadeed tallaalka kama qaadi kartid COVID-19. Sidoo kalena ma awoodid inaad COVID-19 u gudbiso qof kale haddii aad qaadato tallaalka.

Sababtoo ah tallaalku waxa uu difaaca jirkaaga barayaa sida loo aqoonsado loolana dagaallamo fayraska COVID-19, waxaa laga yaabaa inaad yeelato calaamado muujinaaya inuu tallaalku jirkaaga ku shaqeynayo.

### Waxyeelooyinka laga dhaxlo tallaalka waxaa kamid noqon karaa:

- Qandho ama qarqaryo
- Murqaha iyo kalagoysyada oo xanuuna
- Madax xanuun
- Daal
- Lalabbo, matag ama shuban

Waxyeelooyinka daawada waxay soo bixi karaan maalinta tallaalka kadib waxayna soconayaan 1 illaa 2 maalmood.

## Haddii aad u baahan tahay inaad wacdo kalena hadasho balantaada

Khadka Caawimaada Tallaalka ee Ohio State ka wac **614-688-VAXX (8299)** oo dooro ikhtiyaarka 1 ama 2:

**Xulashada 1:** Haddii aad bukaan ku ahayd Jaamacada Ohio oo aad u baahan tahay inaad beddesho, baajiso ama aad wax su'aalo ah ka qabtid ballantaada.

**Xulashada 2:** Haddii aadan bukaan ku ahayn Ohio State una baahan tahay inaad beddesho, baajiso ama aad wax su'aalo ah ka qabto ballantaada.

## Ma u baahan tahay gaadiid kugeeya goobta talaalka?

Si aad u hesho liiska dookhtada gaadiidka aad ku tagi karto balantaada xiggta:

Wac **614-688-8299, dookha 4 aad** ama booqo **go.osu.edu/freeride**.

Sidoo kale waxaad wici kartaa **614-525-6200**. Fariin u dhaaf xubin katirsan kooxda ayaa dib kusoo wici doona si uu kaaga caawiyo inaad qabsato balanta gaadiidka.

## Fal-celinta caadiga ah ee goobta duritaanka

Waxyeelada ugu badan ee laga dareemo meesha cirbada laga qaatay waxaa ka mid ah xanuun, barar ama guduudasho. Waxyeeladaas badanaa waxay baaba'aan 2 da maalmood ee ugu horeeyaa. Dadka qaarkood waxay isku arkaan guduudasho iyo barar oo ku soo laabta toddobaad kadib, laakiin guduudashada iyo bararka oo dhan waa inay dhammaadaan 2 toddobaad kadib marka tallaalka lagu siiyo.

Haddii aad yeelato falcelin goobta lagaa durey ah in ka badan 2 toddobaad, ama aad qabtid su'aalo kale oo ku saabsan waxyeelooyinka gaarka ah, fadlan wac dakhtarkaaga gaarka ah.

## Difaaca tallaalka

**Nidaamka difaaca jirka ee ugu badan ayaa la gaari doonaa 2 toddobaad kadib kuurada 1 aad ee tallaalkaaga ama kuurada 2 aad toddobaad kadib kuurada tallaalkaaga 2-aad.**

Waxaa laguu soojeedin karaa inaad qaado kuuro talaal oo dheeraad ah. La hadal dakhtarkaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

## Si aad wax badan uga barato

- go.osu.edu/COVIDVaccine
- cdc.gov/coronavirus
- coronavirus.ohio.gov
- Laynka Caawimaada Waaxda Caafimaadka Ohio: 1-833-4-ASK-ODH (1-833-427-5634)

## Ma dadaali karnaa?

Inta jirkaagu sameynaayo difaaca, naga caawi in aan kor u qaadno khibradda tallaalka bukaanadeena adigoo fariin falcelin noogu reebaya goobta aad ka heshay talaalkaaga. Waxaad u baahan doontaa akoon Google ah si aad arrintaan u sameyso.

**go.osu.edu/shotreview**

**Hayso kaarka tallaalka ee aad maanta hesho.**

© 2021 – Agoosto 31, 2021, Jaamacada Gobolka Ohio Xarunta Caafimaadka Wexner